

# LIISKA HUBINTA



Haddii aad waysay shaqadaada, waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato faa'iidooyinka Barnaamijka Caymiska Shaqo la'aanta. Si aad u hesho faa'iidooyinka aad xaq u leedahay, waxaad u baahan tahay inaad dhamaystirto hawlahaan. Haddii aad qabto wax su'aalo ama aad u baahan tahay caawimaad, waxaad fariin noogu soo diri kartaa [unemployment.oregon.gov/contact](http://unemployment.oregon.gov/contact) ama wac 877-345-3484.

- Diiwaangeli codsigaaga bilowga ah ee faa'iidooyinka.

**Onleen:** [unemployment.oregon.gov/ocs](http://unemployment.oregon.gov/ocs)

**Taleefoon:** 877-345-3484

- Si degdeg ah u bilow shaqo raadin oo xafid diiwaannada shaqo raadintaada.

- Hubi inaad buuxisay dhammaan shuruudaha u-qalmitaanka, oo ay ku jiraan inaad diyaar u tahay inaad shaqeyso. Wax badan ka ogoow halkan [unemployment.oregon.gov](http://unemployment.oregon.gov).

- Soo gudbi sheegashada toddobaadlaha ah toddobaad kasta si aad u hesho dhibcaha toddobaadka sugitaankaaga iyo toddobaad kasta oo xiga.

**Onleen:** [unemployment.oregon.gov/ocs](http://unemployment.oregon.gov/ocs)

**Taleefoon:** 800-982-8920

- Ka dhamaystir isdiwan gelintaada iMatchSkills® halkan [imatchskills.org](http://imatchskills.org).

- Si kafool kafool ah ula kulan mid-ka-mid ah Khabiirada Shaqada ee WorkSource Oregon wixii ku saabsan hanuunintaada. Waxaad halkaas u tagi kartaa shakhsi ahaan ama waxaad ka qabsan kartaa ballan onleen ah. Wac ama booqo xarunta WorkSource Oregon, ama gal [worksourceoregon.org/contact](http://worksourceoregon.org/contact) si aad ballan u qabsato.

- Xaqiiji aqoonsigaaga. Inta lagu jiro hanuunintaada ee WorkSource Oregon, keen laba dukumeenti oo ah aqoonsiga aasaasiga ah AMA hal dukumeenti aqoonsi hoose iyo mid sare. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dukumeentiyada la aqbali karo ka heli kartaa [unemployment.oregon.gov/ID](http://unemployment.oregon.gov/ID).

Xarumaha WorkSource Oregon waxay siiyaan caawimaad bilaash ah dadka shaqo doonka ah. Ma jiro wax lacag ah oo ku saabsan gelitaanka kumbuyuutarka ee xafiiska WorkSource Oregon ee deegaankaaga.

WorkSource Oregon waxay ku bixisaa caawimaad luuqado kala duwan. Ka wac Khadka helitaaanka Luuqadda kala duwan ee WorkSource Oregon lambarkan 833-685-0845.

**Ma u baahan tahay caawimaad?** Waaxda Shaqaalayaanta ee Oregon (The Oregon Employment Department, OED) waa wakaalad leh fursad loo siman yahay. OED waxay ku siineysaa caawimo bilaash ah si aad u isticmaasho adeegyadeena. Tusaalooyinka qaarkood waa luuqadda dhegoolaha iyo tarjumaannada luuqada lagu hadlo, agab ku qoran afaf kale, far waaweyn, maqal iyo qaabab kale. Si aad caawimo u hesho, fadlan ku dhufo [unemployment.oregon.gov](http://unemployment.oregon.gov) oo guji Contact Us ama naga soo wac 877-345-3484. Isticmaalayaasha TTY waca 711.